

JUMHUURIYADDA SOOMALILAND

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD, 2022

SAYNIS



GUDIDA IMTIXAANAADKA QARANKA



OK



SOM EXAMS

--	--	--

Wadarta guud

Magaca

Dugsiga.....

R/lambar.....

JAMHUURIYADA SOMALILAND
WASAARADA WAXBARASHADA IYO SAYNISKA
GUDDIGA IMTIXAANAADKA QARANKA
IMTIXAANKA SHAHAADIGA AH EE FASALKA 8AAD

SAYNIS

2021 - 2022

WAKHTIGA : 2 SAACADOOD

10 DAQIIO OO DHEERIAAD AH KU AKHRI WARAAQDA SI AAD U HUBISO.

TILMAAMO

Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay 8 waraaqood oo daabacan.
Tiri oo wargeli horjoogaha haddii ay wax kaa maqan yihiin ama ay dheeraad yihiin.
Imtixaanku waxa uu ka kooban yahay 2 qaybood :

QAYBTA KOOWAAD:	20 Su'aalood oo kala doorasho ah	40 dhibcood
QAYBTA LABAAD:	10 Su'aalood oo Kooban	60 dhibcood

WADARTA DHIBCAHA GUUD 100 dhibcood

- Ka jawaab dhammaan su'aalaha qaybta 1^{aad} iyo 2^{aad}
- Lama ogola Moobayl iyo waraaqo kale.

QAYBTA 1^{AAD}: Goobo gali jawabta Sax ah.

(40 dhibcood)

1. Shaqada dhiigu u qabto jidhka xayawaanka waxa mid ah:
 - B. In uu qaab u sameeyo jidhka.
 - T. In uu jidhka gaadhsiiyo cuntada iyo ogsajiinta.
 - J. In uu qashinka ka saaro jidhka.
 - X. In uu ilaaliyo xubnaha jidhka.


2. Footosantasisku waa habka ay cuntada u samaystaan:
 - B. Kaluunku
 - T. Bakteeriyadu
 - J. Dhirtu
 - X. Xooluhu

3. Cudurka waraabawga (Xabada) waxa keena:-
 - B. Jeermis
 - T. Naayseeriya
 - J. Tirobonema
 - X. Fayras

4. Cudurada hawadu gudbiso waxa ka mid ah:
 - B. Kansarka
 - T. HIV/AIDS
 - J. Qaaxada
 - X. Kaneecadda

5. Kaluunku wuxuu ka neefsadaa:-
 - B. Dhagaha
 - T. Sanbabka
 - J. Waafiyaha
 - X. Sanka

6. Jaantuskan ubaxa Xarafka B wuxuu tilmaamayaa qaybta:-
 - B. Ugxanside
 - T. Fur ubbo
 - J. Laace
 - X. Ma laace



7. Marka laba curiye ama wax ka badan ay falgaan soona saaran walax cusub waxa la yidhaa:-

- B. Falgal Duleed
- T. Falgal kimikaad
- J. Iskujir
- X. Milan

8. Marka ay Sodhiyum la falgasho Kalooriin waxa samaysma:-

- B. Biyo
- T. Aysiidh
- J. Cusbo
- X. Beys

9. Biyuhu waxay ka samaysan yihiin:-

- B. Ogsajiin iyo Neydarojiin
- T. Haydarojiin iyo Kalooriin
- J. Haydarojiin iyo Ogsajiin
- X. Kaarboon iyo Ogsajiin

10. Cimilo gooreed waa xaaladda isbaddelka hawada ee ay meeli leedahay:-

- B. Muddo dheer
- T. Muddo Gaaban
- J. Muddo Konton sanno ah
- X. Muddo laba boqol oo sanno ah

11. Astaamaha aysiidha waxa aan ka mid ahayn:-


- B. Dhanaan
- T. Warqadda litmasta oo ay u baddasho casaan
- J. waxay leedahay PH ka yar 7
- X. Warqadda litmasta oo ay u baddasho buluug.

12. Mashiinada hawsha fududeeya waxa ka mid ah:

- B. Khafiyad
- T. Miiska
- J. Girgiraha
- X. Laambadda.

13. Birlabta la soo laalaadiyey cidhifyadeedu waxay tilmaamayaan jihooyinka:-

- B. Bari iyo Galbeed
- T. Waqooyi iyo Bari
- J. Koonfur iyo Galbeed
- X. Waqooyi iyo Koonfur





14. Masaafada walaxi jiho go'an u dhaqaaqdo waxa loo yaqaan:-

- B. Fogaan
- T. Xawaare
- J. Barabax
- X. Kaynaan

15. Walxahan hoos ku cad teebaa ah gubiye kul:

- B. Birta
- T. Looxa
- T. Caagga
- J. Marada

16. Tamarta dhammaan uu nooluhu ku noolyahay wax ay ka timaada:-

- B. Dayaxa
- T. Xiddigaha
- J. Qoraxda
- X. Roobka

17. Cudurka kudku wuxuu ku dhacaa:-

- B. Digaaga
- T. Dameeraha
- J. Lo'da iyo Geela
- X. Fardaha

18. Marka faxalka laga qaado faxalsidaha lana geeyo fur-ubbada isla ubaxii waxa la yidhaa:

- B. Faxal gudbin
- T. Faxal side
- J. ugxaan side
- X. is faxlid.

19. Nafaqeynta Carrada waxa loo isticmaala:-

- B. Quruuruxa
- T. Digada Xoolaha
- J. Dambas
- X. Biraha

20. Beeralaydu waxay dambaska u isticmaashaa:

- B. Nafaqaynta Carrada
- T. Ka difaacida cayayaanka
- J. Furfurida carrada
- X. Biyo gaadhsiinta beerta



Qaybta II^{aad}: Su'aalo kooban

(60 Dhibcood)

Ka jawaab dhamaan su'aalaha hoos ku qoran:

1. Dhirtu iyadaa cuntadeeda sameysata markay hesho saddex shey, sheeg saddexdan shay:

B: (2 Dhibcood)
T: (2 Dhibcood)
J: (2 Dhibcood)

2. Sheeg labada nooc ee diggaagu u qeybsamaan.

B: (3 Dhibcood)
T: (3 Dhibcood)

3. Meertada nolosha balanbaalistu waxay martaa afar meerto, kala sheeg afartaa meerto.

B: (1 Dhibcood)
T: (2 Dhibcood)
J: (1 Dhibcood)
X: (2 Dhibcood)

4. B) Waa maxay isleeg kimikaad? (2 Dhibcood)

.....
.....
.....


T) Qor Maxsuulka soo baxa marka la isku daro:-



- J) Muxuu yahay maxsuulka soo baxayaa marka Sodiyum la falgasho kalloriin. (2 Dhibcood)

.....
.....
.....
.....
.....

5. B. Waa maxay dabarka isku haya Haydarojiin iyo Kolloriin? (3 Dhibcod)



T. Imisa Electron ayey wadaageen Haydarojiin iyo Kolloriin? (2 Dhibcood)

.....
.....

J. Heer-tamartooda u saraysa maxa ku dhacay Haydarojiin iyo Koloriin? (1 Dhibic)

.....
.....
.....

6. B. Sheeg Saddex wax oo loo adeegsado biyaha?

- I: (1 Dhibic)
II: (1 Dhibic)
III: (1 Dhibic)

T. Qor summamada kimikaad ee biyaha. (1 Dhibic)

.....

J. Imisa curiye ayey ka samasan yihiin Biyuhu? (2 Dhibcood)

.....
.....

7. Magacow Saddex nooc oo ka mid ah noocyada Tamaraha:

- B: (2 Dhibcood)
T: (2 Dhibcood)
J: (2 Dhibcood)

8. Sheeg saddex qodob oo caawiya daryeelka indhaha:

- B: (2 Dhibcood)
T: (2 Dhibcood)
J: (2 Dhibcood)

9. B. Sheeg saddex nooc oo beeraha loo isticmaalo:

- I: (1 Dhibic)
II: (1 Dhibic)
III: (1 Dhibic)

T. Qor waxyaalaha lagama maarmaanka u ah dhul diyaarinta midho beerista.

- I: (1 Dhibic)
II: (1 Dhibic)
III: (1 Dhibic)

10. B) Magacow saddex nooc oo ka mid ah dhirta ay ininiintooda firdhiyaan
xayawaanku?

- I: (1 Dhibic)
II: (1 Dhibic)
III: (1 Dhibic)

T) Qor saddex ka mid ah waxyaabaha dhaca marka ay bacrimintu dhacayso:

- I: (1 Dhibic)
II: (1 Dhibic)
III: (1 Dhibic)

DHAMMAAD